



Ku dhowaada inaad ku safartaan gaadiidka Dalatrafik.

Sidaan ayaad sameyneysaa

Soo istaag maxaddada aad ka raaceyso.

Marka basku soo istaago, ka gal albaabka xagga hore. Isku daya inaad kala dambeysaan si ay dareewalka ugu suurtagasho inuu idin caawino.

Waxaad dareewalka ka iibsana kartaa tigidh hal mar lagu raaco. Haddii aad wadato kaarka lagu raaco, waxaad kaarka u aaddineysaa mishinka akhriya. Haddii kolkaas nal cagaarini daarmo, markaas gudaha ayaad u sii gudbeysaa.

Haddiise aad wadato kaarka lacag lagu shubto (khasnadda safarka), waxaad kolkaas u sheegeysaa dareewalka meesha aad u socoto.

Waxaad mar walba iibsana kartaa tigidh hal mar lagu raaco ama waxaad lacag ku shuban kartaa kaarka safarka (Resekort) si aad u raacdo baska. Haddii lagugu qabto adigoo aan tigidh haysan waxaa lagu ganaaxayaa 700 karoon.

Mar walba oo aad raaceyso basaska u safra tuulooyinka ama kuwa aan meelo istaagin, xiro xarigga kursiga. Xarigga kursigu wuxuu safarka ka dhigayaa ammaan, waana sharci in la xirto xariggaas.

Dareewalka basku isaga ayaa mas'uul ka ah iyo ammaankiisa, wuxuu sheego ayaana soconaya.

Marka la gaaro meesha aad socotey, waxaad riixaysaa badhanka guduudan ee istaagga. Kolkaas wuxuu dareewalku istaaginayaa baska maxaddada ku xigta.

Sug ilaa basku ka istaagayo, kadibna waxaad ka degeysaa baska albaabkiisa xagga dambe.

Halkaas ayaad ka iibsaneysaa tigidhka ama ka cebbeysaneysaa

Baska

Halkaan waxaad tigidhka hal safar ama waxaad kaarka ku shuban kartaa safarka hal mar ama midka xilliga. Waxaad ku bixineysaa lacag caddaan ah ama lacagta kaarka kuugu kaydsan.

Meelaha ganacsiga

Waxaad halkaan ka iibsana kartaa tigidh hal mar lagu raaco ama waxaad kaarka safarka ku dhubaneysaa safar hal mar ah ama mid xilli ah. Waxaad safarka ku bixin kartaa lacag caddaan ah ama kaarka bangiga ama kaydka kuugu jira kaarka safarka.

Mishinada awtomaatiga oo tigidhaha laga iibsado

Waxaad halkaan ka iibsana kartaa tigidh hal mar lagu raaco ama waxaad kaarka safarka ku dhubaneysaa safar hal mar ah ama mid xilli ah. Waxaad safarka ku bixin kartaa kaarka bangiga ama kaydka kuugu jira kaarka safarka.

Moobiilka

Waxaan haynaa barogaraam loo yaqaan Appka mooboolka oo ka iibsana karto safarka hal mar ah adigoo ku bixinaya kaarka bangiga ama kharash-bixin gadaal lagaaga soo dirayo (laakiin ma isticmaali kartid kaarka bangiga ee dalalka kale).

Habka ganacsiga Internet

Habkayaga ganacsiga Internet waxaad lacag ku shuban kartaa kaarka safarka adigoo isticmaalaya kaarka bangiga ama bangiga (laakiin ma isticmaali kartid kaararka bangiga ee dalalka kale).

Tigidhada iyo kaararka safarka oo aan iibinno

Tigidh hal safar

Waxaa loogu talagalay qofka marmar safraya. libso tigidhka masaafada aad ku socoto. Tigidhka waxaa ku raaci kara qof qura.

Kaarka safarku waa kaar lagu shubto kayd safar ama qiime hal xilli

Qasnadda safarka

Kaarka safarka waxaad ku shuban kartaa lacag safar oo kayd ah. Kadib mar walba oo aad safreyso waxaad tigidhka ku bixineysaa lacagta kuugu kaysan qasnadda safarka. Habkaasina wuxuu qiimaha safarka kaa dhimayaa boqolkiiba 20.

Cabbaynta xilliga ah

Waxaa loogu talagalay qofka badanaana safraya. libso qiimaha ku habboon meelaha aad u safreyso. Cabbaynta xilliga waxaa ku safri kara hal qof safarkiiba.

Waxaad kala dooraneysaa soonaha 1 ama 2, ama degmada ama gobolka oo dhan.

Xadadka da'da

- Dhallaanka iskoolka 7 – 19 sano
- Dhallinyarada 20 – 25 sano
- Dadka waaweyn 26 sano iyo ka weyn
- 2 carruur ah oo da'doodu u dhexeyso 0 – 6 sano waxay ku raacayaan lacag la'aan haddii ay la socdaan qof weyn.

Intaas waxaa dheer

Goorta basku baxo

Dhammaan basaska waxaa ku qoran lambarro, taas oo ku xiran hadba meelaha ay isaga dhexgooshaan, waxayna leeyihiin jadwal u gaar ah. Waxaad jadwalkaas ka heleysaa barta aan ku leenahay Internet oo ah: www.dalatrafik.se.

Haddii aad ku hadasho afka ingiriisiga waxaa sidoo kale waci kartaa adeegga macmiisha oo lambarka telefoonku yahay 0771-95 95 95

Tareenka

Kaarka safarada ee Dalatrafik oo xilliga loo goostay waxaa lagu raaci karaa dhammaan tareenada isaga goosha gobolka Dalarna. Balse mar walba oo aad ku raaceyso tareenka, waa inaad haysataa risiidkii aad ku bixisay kharashka safarka.

Haddii la isaga yeero rugaha caafimaadka

Haddii aad maamulka gobolka ka hesho yeeritaan inaad isbitaalka tagto, waxaad kolkaas baska ku raacaysaa lacag la'aan. Tus dareewalka baska warqadda yeeritaanka. Waxaa warqaddaas yeeritaanka ku raaci kara hal qof, laakiin haddii uu qofkaasi ka yar yahay 19 sano, waa in uu markaas la socdaa qof kale. Waxaana warqaddaas lagu safri karaa maalinta yeeritaanka.

Shirkadda Dalatrafik waxay kuu rajeyneysaa safar wanaagsan.